



AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-06

KU DHAWAAQIDA CARQALADA AAN CAADIGA AHEYN EE SUUQA SABAB LA XIRIIRTO COVID-19

Xiliga Maarso 8, 2020, waxaan ansixiyay Amarka Fullinta Lambarka. 20-03 oo ku dhawaaqayo xaalad degdeg ah sabab la xiriirto dilaaca fayraska Corona (COVID-19) ee Oregon. Ku dhawaaqidaan waxay aqoonsantahay halista caafimaadka bulshada “sareyso” ee imaan karta ee mawaadaniinta Oregon sabab la xiriirto cudurka neefsashada ee cudurka fayraska corona, kaas oo leh filashada sababi karo jiro halis ah ama qasaaraha nafta. Sida aqoonsan nooca halista ah ee COVID-19, xiliga Janaayo 30, 2020, Guddiga Gurmada Xiriirada Caafimaadka Caalamiga ah ee Hay'ada Caafimaadka Aduunka waxay ku dhawaaqeen in dilaaca “walaaca caalamiga ah ee gurmada caafimaadka bulshada.”

ORS 401.965(5) waxay xoojisaa Duqa magaalada si ay ugu dhawaaqaan carqalad aan caadi aheyn oo suuqa markii degdeg walba ka celiso alaabaha iyo adeegyada macmiilka muhiimka ah ee la heli karo. Xiliga Maarso 16, 2020, Qareenka Guud wuxuu isoo ogeysiiyay in saadadka nadiifinta iyo nadaafada aasaaska ay si gaar ah u adkaaneyso in la helo. Qiimooyinka saadadka caafimaadka sida jeermis dilaha gacmaha iyo maaskarooyinka, sidoo kale sida alaabaha kale iyo adeegyada muhiimka ah ee macmiilka, si weyn u kaceen iyo saadadka yaraadeen tan iyo Janaayo 30, 2020.

HADEER, SIDAAS DARTEED, WAXAA LAGU JAHEEYAY OO LAGU AMRAY:

1. Sida la ogaaday in dilaaca COVID-19 uu yahay arinta degdeg ah oo ka illaaliso alaabaha iyo adeegyada macmiilka muhiimka ah ee la heli karo, waxaan halkaan ku cadeynayaa in in carqalad aan caadi aheyn oo suuqa bilowday saacada 12:00 a.m. ee Janaayo 30, 2020, oo dhammaan gobolada Oregon.
2. Dadka aaminsan inay quseyso qiimooyin xad dhaaf ah aan jaheysneyn oo alaabaha macmiilka muhiimka ah sabab la xiriirto carqaladaan waa in la soo wargeliyaa anshaxaas qadka Waaxda Illaalada Cadaalada Macmiilka Oregon, ee 503-378-8442. (Macaamiisha waxay sidoo kale booqan karaan www.OregonConsumer.gov.) Waaxda Cadaalada Oregon waxay leedahay ogolaanshaha lagu baarayo dhaqamada gacsiga aan sharciga aheyn.



**AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-06
BOGGA LABO**

3. Amarkaan wuxuu shaqeynayaa sodon maalmood illaa lagu kordhiyo ama dhaqsi la joojiyo.

Lagu sameeyay Portland, Oregon maalintaan 17^{aad} ee Maarso, 2020.

Kate Brown
GOFANATOORAHA

CADEYNTA:

Bev Clarno
XOGHAYAH GOBOLKA